Sheega shooyinka Al-shabaab iyo Ficilkooda is khilaafsan

Ururka Al-shabaab wuxuu horay umadda soomaaliyeed ugu sheegay in ay diinta ilaahay u gar gaarayaan oo ku dhaqankii shareecada soo celinayaan, taasoo dad badani run moodeen, soona dhoweeyeen, maadaamaa dadka soomaaliyeed yihiin dadm muslim ah oo diin jecel, hase ahaatee nin waliba wixii uu cuno ayuu daacaye ururku wixii uu dadka u sheegay dhalin yaro bandanna ku hawl geliyey run waa noqon wayday, wuxuuna la soo baxay wixii uu qarsanayey ee uu ku taamayey maalin uun inuu gaaro, waxayna lasoo baxeen tabahakan.

1. Waxay sabab u noqdeen in dalka cidamo shisheeye soo galaan, misna ay difaaci waayaan fariisin walbana ay ka cararaan markii Amisom ku soo dhowaato.

2. Waxay been ka sheegeen jihaadkii iyo ujeeddooyinkii loo tashriiciyey.

3. Waxay dil iyo qarax ku bilaabeen umaddii muslimka ahayd ee la rabay in ay difaacaan iyagoo maalinba bulshada marba qayb laynayey ugu dammayntiina laayey Culumadii ugu mudnayd waddanka, halkii ay ahayd in ay gaalada la dagaalamaan sidii ay markii horeba innoo sheegeen.

4. Waxay masaajidda ka dhigeen meel laga cabsado oo jamaacaadkii la imaan waayo.

5. Waxaa mar walba daliil iyo xujo u ah handadaad, caga juglayn iyo waan ku dilaynaa markii ay xujo diimeed waayeen, waana sida lagu yaqaan dadka ahlul baadilka ah.

Isu fiiri sheegashadoodii hore iyo ficillada ay samaynayaan mays leeyihiin mise way is khilaaf san yihiin? Qofku wax wanaagsan wuu sheegan karaa laakiin qofna ficilkiisa urumeeya qofna ficilkiisa beeniya, dhegeyso markay warbaahinta ka hadlayaan **hadalkoodu fiicanaa!!** Diintaan difaacaynaa, islaamkaan u hiilinaynaa, shareecadaan dalka ku dhaqaynaa.

Ficilkoodana fiiri: muslimka oo la dilo, la qarxiyo, diinta oo been laga sheego iyo masaajidda oo muslimka laga cayriyo, akhristow is waafaji adigu,

DHANKA KALE NIMANKU MAXAY KHAWAARIJ WADAAGAAN?

Bal aynu is bar-bar dhigno inagoo dib u milicsanayna axaadiithtii uu Nebigu kaga waramay khawaarijta iyo tilmaamohooda iyo tilmaamohooda waxaynu sheegidonaa dhawr xadiith oo Rasuulku khawaarij kaga waramay SCW wuxuu yiri:

1. **قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: " ، يحسنون القيل ويسيئون الفعل، يدعون إلى كتاب الله وليسوا منه في شيء.**

Macnaha xadiithka:(hadalka way wanaajinayaan ficilkana way xumanayaan kitaabka alle ayey sheeganayaan iyagoo aan waxba kaga sugnayn) akhristow Al-shabaab sifadaas malee yihiin? Haa wayba ku dhabowday, tilmaan kale oo ay leeyihiin khawaarijtu oo Nebigu innoo sheegay iga qabo wuxuu yiri Nebigu SCW

2. **من حديث أبي سعيد الخدري رضي الله عنه، وهو قوله عليه الصلاة والسلام عن الخوارج (:يقتلون أهل الإسلام ، ويدعون أهل الأوثان)**

Macnaha Xadiithka: (waxay laynayaan dadka islaamka ah gaaladana way iska daynayaan)

Bulshooy masheegi kartaan meel ay gaalo kula dagaalamayaan?, dagaalka ma waxay ka wadaan dhul gaalo mise dhulkii islaamka, iyaga iyo kuwa lamidka ahi, Ciraaq arag, Baakistaan arag, soomaaliya imoow magaalo kasta markii xoogaa yugaandhays ah lasheego ama xogaa

Burundi ah way ka cararayaan markhaanti baad ka tihiin, halka dadka muslimiinta ah ay ku dilayaan masaajidda meelkalena iskabadaa.

Tilmaan saddexaad iyo afraad oo ay leeyihiin wuxuu yiri Nebigu SCW:

3. قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: « سيخرج قوم في آخر الزمان حداث الأسنان سفهاء الأحلام يقولون من قول خير البرية لا يجاوز إيمانهم حناجرهم.

Macnahah Xadiithka: (Aakhiru Zamaanka waxaa soo bixidoona dad sinnigoodu (de,doodu) yartahay, caqli yar waxay oranayaan wax ka kamid ah qowlka midkii dadka ugu khayrka badni ku hadlo, iimaankooduse dhuunta dhaafimaayo)

Tilmaamahaas oo dhan oo uu nebigu ku sheegay khawaarijta al-shabaab ma leeyihiin sifiican u fiiri? Jawaabtu waa haa, markale aan kuusoo koobo tilmaamaha khawaarijta.

1. Hadalka way wanaajiyaan ficilkana way xumeeyaan
2. Islaamkay laynayaan gaaladana way daayaan
3. Waa dad deyara oo aan waaweynayn
4. Waa dad aan caqli lahayn

Tilmaamahaas uu nebigu khawaarij ku sheegay dhammaan Al-shabaab way leeyihiin iyaguna ma beenin karaan, hadaba sheegashadii al shabaab iyo shaqadoodii sow isma khilaafin?

Dhanka Bulshada: Bulshooy Roobkii onkoday biyo madhigin,hillaaciina beenow, indhihiinna ayaadna ku aragteen waxa ay al shabaab samaynayaan iyo wixii ay markii hore innoo sheeg teen maxaa idinla gudboon mar haddaad in dhihiinna ku aragteen diintii oo la duminaayo oo tiirarkii ay ku taagnayd marba tiir la bixinaayo? Ma tiirarka haray ayeyno innana bixinnaa mise waynu difaacnaa ? waqti aynu alshabaab ka barano waa soo marnay, in bandanna qaladaadkooda waynu ka indho laabannay laakiin sidaad ila qiraysaan waxay soo gaareen meel aan laga indho qarsan Karin, lagana aamusi Karin.

Qur,aanka ilaahay waxaa ka mid ah

قوله تعالى: ﴿ أَوَلَمْ نُعَمِّرْكُمْ مَا يَتَذَكَّرُ فِيهِ مَنْ تَذَكَّرَ وَجَاءَكُمُ النَّذِيرُ (37) ﴾

(Miyaannaan idin cimri siin in uu ku waan samo mid waan samaya, digihiina miyuusan idiin imaan.) waqti aynu nimankaas ka barano oo dheer alle wuu inna siiyey culumaduna in badan waa inooga digeen miyaynaan waan samayn walaalayaal.

Tilmaan kale oo lagu garto dadka ahlul baadilka ah: ahlul baadilku markay xujo diineed wax ku qancin waayaan waxay isticmaalaan handadaad, caga juglayn, iyo waan ku dilayaa ,taariikhda dib u eeg, fircoon ka soo biloow markii Nebi muuse ka xujo badiyey oo suxaradii xaqii u caddaaday wuxuu yiri allaa inooga waramay

قال تعالي: قال آمنتم له قبل أن آذن لكم إنه لكبيركم الذي علمكم السحر فلسوف تعلمون لأقطعن أيديكم وأرجلكم من خلاف ولأصلبنكم أجمعين (49)

Macnaha aayadda: (ma waxaad rumayseen anoo aan idiin fasixin, wuxuuba ahaa kii ugu weynaa ee sixirka idin baray waad ogaan doontaan waxa idin ku dhaca waxaan idin ka jarayaa gacmaha iyo lugaha weliba si is dhaaf ah, dhammaantiinna waan idin salbinayaa.) ufiirso xujo kale mahayo warkiisii wuxuu ku soo ururay waan idin laynayaa, dadka aan xaqa wadin saas ayaa lagu yaqaan.

Dhannka kale fircoon wuxuu sheegtay in uu isagu saxan yahay oo xaqii ku taagan yahay Nebi Muusena qaldanyahay sida alle inooga waramay aqri qowlka alle:

كما قال تعالي: ما اريكم إلا ما أرى وما أهديكم الا سبيل الرشاد. . أي قال فرعون ما أعلمكم وأعرفكم من حقيقة موسى وأنه ينبغي أن يقتل ، خوف أن يبدل دينكم ، ويظهر الفساد في أرضكم ، إلا ما أرى ، أي : أعلم وأعرف أنه الحق والصواب فما أخفي عنكم خلاف ما أظهره لكم ، وما أهديكم بهذا إلا سبيل الرشاد ، أي : طريق السداد والصواب .

(idin tusin mayo {aragti kale majirto} waxa aan anigu arkayo maayaane mana idin ku hanuuninayo wadada toosan meeyee meelkale)

Eeg Nebi Ibraahim markuu aabihiis xujo cad ku ooogay oo xaqii u caddeeyey (..... قال أراغب أنت عن آلهتي يا إبراهيم لئن لم تنته لأرجمنك. الخ)

Macnaha aayadda: (Ma waxaad iga jeedinaysaa ilaahyadayda ibraahimow, haddaadan arrintaas ka joogsan waan ku rajminayaa)

Dhammaan dadkaas ahlu baadilka ahi waxay isu haysteen inay saxan yihiin oo iyagu xaqii kutaagan yihiin, Nebegeenna SCW waxaa u yimid nin isagoo qaniimo qaybinaya xadiithkan hoos ka aqri.

عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه قال: بينما نحن عند رسول الله صلى الله عليه وسلم وهو يقسم قسماً، أتاه ذو الخويصرة، وهو رجل من بني تميم، فقال: يا رسول الله اعدل، فقال: ((ويلك، ومن يعدل إذا لم أعدل، قد خبت وخسرت إن لم أكن أعدل)

ninkii wuxuu ku yiri Nebiga scw: **(rasuulkii ilaahayoow cadaalad samee, rasuulku wuxuu ugu jawaabay hooggaagee yaa caddaalad samaynaya haadii aanan caddaalad samayn**). Ninkaasi wuxuu isu arkayey in uu rasuulka ka saxsan yahay, rasuulkuna caddaalad darro ku shaqaynayo oo qaniimada ku qaybinayo.

Gabagabadii ururka al shabaab waxay isu arkaan inay iyagu saxan yihiin xaqiina ku taagan yihiin jannadiina lagu helayo muslimka oo masaajidda lagu laayo ama laga cayriyo, waxayse soomaalidu ku maahmaahdaa **(sidaas isku taaqaan ma tihide sida laguu yaqaan ayaad tahay)** waxaa kaloo arintaas sii cadeeyey Xadiithkii Nebigaan SCW oo tilmaamayey laba jinaazo oo Nebiga iyo saxaabadoo wada fadhiya la soo mariyey markaasay saxaabadu midkood khayr iyo wanaag ku faaleyeen oo ku tilmaameen midka kalene shar ku tilmaamen

فقال صلى الله عليه وسلم: (أما الأول فأثنيتم عليه خيراً فوجبت له الجنة، وأما الثاني فأثنيتم عليه شراً فوجبت له النار،) {أنتم شهداء الله في أرضه}

(waxaad tihiin markhaantiga ilaahay uu adduunka ku leeyahay) labadaas jinaazo saxaabadu waxay sheegeen keliya midba wixii ay ku yiqiinneen marka bal fiiriya umaddu waxay idin ka rumaysantahay iyo siday idiin taqaan ma wanaag baa mise waa shar? Dib isu waydiiya wixii ay umaddaas muslimka ahi idin ku taqaano iyo siday idiin taqaano uun baad tihiin innagoo xadiithkaan daliishanayna.

W/Q: C/raxmaan Aw Ciise Muuse